

Macluumaadka  
loogu talagalay  
Xubnaha Qoyska:

Ka digtoonow Khatarta  
Xakamaynta Caabuqa  
iyo Tallaabooyinka aad  
ku Ilaalinayso Qofka  
aad Jeceshahay ee  
**Isbitaalka La Dhigay**



## Sida Aad U Ilaalin Karto Qofka Aad Jeceshahay ee Xanuunsan

Caabuqyadu waa cudurro uu keeno jeermiska sida bakteeriyyada, fangaska, ku dul-noolayaasha, iyo fayrasyada. U beylah dhigida bukaanada xanuunsan jeermiskaan waxay ku adkeyn kartaa bukaanka inuu ka soo kabsado oo uu aado guriga. Haddii aad booqanayso saaxiib ama qof aad jeceshahay, waxaad u baahan tahay inaad sameyso tillaabooyin aad uga hortagayso faafitaanka jeermiska.

Sida ugu wanaagsan ee lagu **joojin karo fiditaanka jeermiska** waa:

- **Dhaqida aalaaba gacmahaada**
- **Joogista guriga haddii aad xanuunsan tahay**- Ha booqan isbitaalka haddii aad jiran tahay ama aad isku aragtay calaamado jirranaanta oo ay ku jiraan lallabbo, matag, shuban, qandho (ama qandho dareemida), qufac aan la xakameynin, ama finan
- Haddii qofka aad booqanayso uu ku jiro "Taxadarada Karantiilida," la hadal kalkalisada ka hor inta aanad qolka gelin si aad u ogaato tillaabooyinka aad qaadi doonto, sida xidhashada maaskaro ama dhar kale oo ilaalim ah.

## Ka Warqab Khataraha Sababtoo ah Waa Taxadartaa

Gacmaha ayaa ah habka ugu badan ee jeermisku ugu faafo. **Nadaafadda gacmaha waa mid ka mid ah siyaabaha ugu muhiimsan ee qoyska iyo saaxiibada ay u joojin karaan faafitaanka jeermiska iyo caabuqyada.**

Saabuunta iyo nadiifiyaha gacmaha ee yaala qolalka bukaanada ayaa loogu talagalay **qof walbaa** inuu isticmaalo!

- **Dhaq ama nadiifi gacmahaaga markaad soo galayso iyo, marka aad ka baxayso qolka.** Xusuusi shaqaalaha daryeelka caafimaadka inay sidaas oo kale sameeyaan ka hor intaysan siin daryeelka kuwa aad jeceshahay.
- Si loo siiyo naxariis bukaanada xanuunsan, booqdayaashu waxay inta badan rabaan inay gacmaha qabsadaan ama isku duubaan ama dhunkadaan xubnaha qoyskooda. Iyadoo falalkani ay muujinayaan jacayl iyo saaxiibtinimo, waxay sidoo kale gacan ka geysan karaan faafinta jeermiska. Soo booqdeyaashu waa inay **isticmaalaan daryeel markay isku duubayaan bukaanka si ay u xaqijiyaan in gacmehooda, faruurahooda ama dharkooda aanay taabaneynin meel uu bukaanku uu ugu nugul yahay inuu caabuq ka qaado.**
  - Aaladaha caafimaadka sida faleenbada, tuubada quudinta ama goob dalool jidheed ah sida dhaawac ama goobta qaliinka lagu sameeyay waxay abuurtaa fursad uu jeermisku kaga gali karo jidhka ama qulqulka dhiiga bukaanka oo uuna u keeno caabuq.

**Oogooyinku waxay si sahal ah ugu wasakhaysan karaan** goobaha daryeelka caafimaadka jeermiska hawada ku jira ama kan ka imaada dhiiga iyo dareeraha jidhka. Marar badan, jeermisyadani aad bay u yar yihiin in lagu arko isha oo keliya. Si looga fogaado in jeermiska uu ku faafo oogada, booqdayaasha, iyo bukaanadu waa in:

- **Dhaqaan gacmehooda ama isticmaalaan gacmo nadiifiyaha** ka hor iyo ka dib taabashada aaladaha caafimaadka, qalabka, garbaha sariirta, oogooyinka, ama goobaha ka daloolka jidhka, ka hor iyo ka dib cunto cunista iyo ka dib isticmaalka musqusha.
- **Ay yareeyaan isku dhexdaadinta** oo ayna ku xifdiyaan alaabta bukaanka meel ka sareysa sagxada guriga ama meel ka fog weelasha qashinka.
- **U ogolaadan dadka inay nadiifiyaan qolka isbitaalka**, xitaa marka ay dareemaan dhib. Nadiifinta iyo jeermi-dilidda qolka waxay gacan ka geysataa in qof walba badbaadsanaado iyadoo yaraynaysa khatarta ku aadan kobcida caabuqa - ha odhan, "hadhow soo noqo (come back later.)"